

Sharci lamba. 5 ee 30 Janaayo 1967

Sharciga Xeerinaya daryeelka dhaqaale iyo qaynuunka 3da xubnood ee Golaha Qaranku u magacaabay Golaha Sare ee Garsoorka

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii uu helay oggolanshaha Golaha Qaranka;

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

1. Iyadoo la hirgelinaya faqradda 2 ee qod. 27 ee Xeernidaamiyaha Garsoorka (Dekreee-Sharci lamba. 31 ee 12 Juun 1962) waxaa loo oggolaaday xubin kasto ee 3da xubin ee loo magacaabay Golaha Sare ee Garsoorka in la siiyo gunno bille ah oo dhan Sh.So. 1.000 laga bilaabay maalintii loo doortay jagadan;
2. Kharajkaan waxaa laga bixin Misaaniyadda Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta – Cutubka 1.3.3.- gunnoyinka- kaas oo fursaadiisi oggol;
3. Xubnaha loo magacaabay jagada Golaha Sare ee Garsoorka markii ay fulinayaan howlahooda waxay:
 - a) Hoos tegi doonaan amarrada ku tilmaaman faqradaaha 2aad iyo 3aad ee qod. 3 ee shaxda ku lifaaqan Xeernidaamiyaha Garsoorka;
 - b) Jagadoodu waxay u dhigmata sharci ahaan kuwaa La-taliyaha Maxkamada Sare.

Qod. 2

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah waxana lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ee Shuurucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la faraaya cid kasto in loo hoggansado sharciga loona hoggamiyo cidka.

Muqdisho, 30 Janaayo 1967.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta
Sh. Hassan Abdullahi